UNHCR
The UN
Refugee Agency

# WARBIXIN KU SAABSAN DIB U DAJINTA
# OO LOOGU TALO GALAY DADKA QAXOONTIGA EE PAKISTAN JOOGA

Xogtani waxay waxay macluumaad aasaasi ah oo ku saabsan barnaamijka dib u dajinta ee UNHCR siinaysa dadka qaxoontiga eek u nool Pakistan.

## WAA MAXAY DIB U DAJINTU?

UNHCR waxa loo xil saaray inay xal waara u hesho qaxoontiga. Caalamka, waxa jira saddex nooc oo xal waara ah: (1) in si mutadacwacnimo ah wadankiisii hooyo dib loogu celiyo), (2) in degenaansho iyo dhex gal bulsho looga raadiyo wadanka uu magangalyo donka ku yahay (halkan pakistanba loog gol leeyahay), (3) dib u dajin wadan saddexaad.

Dib u dajin wadan saddexaad ah" waxa looga jeedaa in qofka qaxoontiga ah loo ogolaaday in uu u socdaalo oo si sifo sharci ah uu u dego wadan kale.

Wadamada dib u dajintu waxay sanadkiiba bixiyaan kaliyata tiro yar oo kooban oo dib u dajina (helaaana in ka yar 1% qaxoontiga dunida oo dhan), taas oo loo qoon deeyay dadka qaxoontiga ugu nugul dhibta, Sida daraadeed, dib u dajintu ka xal waara ahaan wa fursad ay heli karaan kaliyaata dad yar oo kooban oo qaxoonti ah, kuwaas oo buuxiyay shuruudo kooban oo ay qeexeen wadamada dib u dajinta iyo UNHCR.

Wadanka raba inu qaxoontiga dib u dajin ahaan u aqbalo waxa la ga yaaba in aanu ahayn kay qaxoontigu rabeen.

**Dib u dejintu maaha xaq u qofku leeyay:**
Dib u dajintu waa xal loogu talo galay qaxootiga ku jiro duroofo gaara ah.

**Dib u dajintu maaha automatic:**
Aqoonsiga qaxoontinimo u horseedi maayo qofkasta oo qaxoonti ah inu xaq u yeesho in wadan sadexaad dib u dajin loogu dajiyo.

## QOFMA AYAA LAGA YAABA IN LO TIX GALIYO DIB U DAJIN?

Dadkan soo socda ayaa dib u dajin loo tix galinayaa hadii ay qabaan baahi difaaceed/ilaalineed oo gaara Pakistan gudaheeda.
1. Qofkasta oo dhalasho ahaan aan Pakistani ahayn oo hayada UNHCR awoodeeda lo igmaday ay ugu aqaansatay qaxoontinimo
2. Dadka dhalasho ahaan Afghan ta ah ee haysta card POR ah oo aan dhicin.

UNHCR waxay kiiskasta ku samaysa dib u eegis ku salaysan shuruudo ay dhigeen wadamada dib u dajinta bixiya iyo UNHCR, waxa la qiimeeya arimo kala duwan oo ay ka mid yihiin sababihii ka keenay wadankiisii iyo xaalada hada uu ku suganyay Pakistan.

## SDIDEEBAA NIDAAMKA DIB U DAJINTA LOO SAMEEYAA?

Talaabada 1aad: Hadii aad haysato card PoR ah oo aan dhicin, waa inaad marto Qiimaynta Baahida ilaalinta qofka Loo qabo ee la dhaho (PNA) taas oo lagu sameeyo mid ka mida xafiisyada UNHCR la shaqeeya. Natiijada PNA waxa lala wadaagayaa UNHCR si ay baadhitaan horle ugu samayso.

Hadii UNHCR awoodeeda loogu egmaday habka go'aaminta xaalada qaxoonti ee shaqsiyeed ay kuugu aqoonsatay qaxoontinimo, UNHCR si toos ah bay baadhitaan hor leh ku samaynaysaa dacwadaada si loo ogaado bal in kiiskaagu u qalmo dib u dajin.

Talaabada 2aad: UNHCR Waraysibay ka qaadaysa si loo qiimeeyo bal inaad buuxisay shuruudii dib u dajinta.

Talaabada 3aad: UNHCR hadii ay go'aan ku gaadhey inaad shuruudi dib u dajinta buuxisay, UNHCR waxay kiiskaaga u diraysa wadan dib u dajina hab qoraal ah baana luguugu so wargalinaya wadanka dib u dajinta ee kiiskaagii loodiray. Talaabada afraad waxa raaci doona sidoo kale hadii UNHC ay go'aamiso inaadan u qalmin dib u dajin qoraal ahaan ba Iyana la guugu so wargalinaysa.

Talaabada 4aad: Gudbinta ka dib, dalka dib u dajintu wuxuu dib u eegis ku samayn doona dacwadaada markaasu ama waraysigi dib u dajinta kuugu yeedhi ama uu dacwadaada diidi. Wareysiga waxaa samayn doona saraakiil ka tirsan dalka dib u dejinta, waraysiga ka dib, hab qoraal ah ayaa laguugu so war galinaya in lagu aqbalay dib u dajintii iyo in lagu diida.

Talaabada 5aad: Haddii uu ku aqbalay dalka dib u dejintu, UNHCR iyo Hay'adda Caalamiga ah ee Socdaalka (IOM) ayaa kaa caawin doonaa baarista caafimaad, waraaqaha safarka, ruqsada bixitaanka, guubaabinta dhaqanka iyo ka tagitaankaga Pakistan ee dalka dib u dejinta.

Talaabada 6aad: Markaad so gaadho dalka dib u dejinta waxaad ka heleysaa taageero maamulka socdaalka ee dalka.

## WAAJIBKA LAGUUGU LEEYAY INAAD RUNTA SHEEGTO

Inta aad waraysiyadu socdan (talaabada 2aad iyo 4aad ee kor lagu soo sheegay), UNHCR iyo wadanka dib u dajintu waxay ku waydiin doonaan faahfaahin ku saabsan taariikhdaada, sababaha aad wadankaaga uga timi iyo xaalada aad hada ku sugantey Pakistan. Waxa muhiima in macluumaadka aad bixinayso ay cadyiin, dhamaystiranyiin saxna yihiin; UNHCR iyo iyo wadanka dib u dajintu waxay ku tiirsanaan doonan macluumaadkan marka dacwadaada la tixgalinaayo, la qiimaynayo inta lagu aamini karo iyo inaad u qalanto dib u dijin. Sababtan awgeed waa inaad runta sheegta ka tagina macluumaad kasta oo dacwadaada xidhiidh la leh.

## YAA ISKA LEH GO'AANKA KAMA DANBEYSTA EE AH IN DIB U DAJIN UU II AQBALO WADAN SADEXAAD?

Wadanka dib u dajinta ayaa iska leh go'aanka kama danbeysta ee ah in qofka qaxoontiga ah in dib u dajin looga aqbalo wadankan iyo inkale.

## INTEE IN LEEG AYEY QAADANAYSAA HAWSHA DIB U DAJINTUU?

Iyada oo ay ku xidhantey wadanka dacwadaada loo gudbiyay, iyo waxyaabaha kale ee loo baahanyey, habka dib u dajinta, sida lagu so qeexay talaabada koowaad ila ta lixaad, waxay qaadan **karta lixbilood ilaa hal sano ama xata in ka badan,** fadlan la soco waxa laga yaaba inay hawsha dib u dhigaan clearance ka khasab ka ah/ macluumaadka dheeraadka ah ee ay u baahanyiin masuuliyiinta wadanka dib u dajintu ee dacwada shakhsiga ah.

## MAXA DHACAYA HADII AANAN BUUXIN SHURUUDAHA DIB U DAJINTA?

Marka la eego tirada kooban ee dib udajinta ee caalamka oo dhan, inta badan qaxoontigu xaq uma helayaan dib u dajin.

Hadii UNHCR go'aan ku gaadho inaadan buuxin shuruudiihii dib u dajinta, waxaad heli doonta warqad cadaynaysa go'aankan.

Hadii kiiskaaga uu so diido wadanka dib u dajinta, UNHCR dib bay u qiimaynaysa kiiskaaga bal in dib u dajin wadan kale loo gudbin karo. Hadii UNHCR ay go'aansato in aan wadan kale kiis kaaga lo gudbin Karin, sidoo kale waa lagugu so wargalinayaa.

Diidmada ay kiiskaaga diiday UNHCR ama wadanka dib u dajintu diido xaq kuuma siinayso inaad in lagu sameeyo rafcaan. Siday doontaba ha ahaate mar hadii aad tahay qof qaxoonti lo aqoonsaday ama haysta cardka POR, xaquuqdii uu laha qofka qaxoontiga ah ee Pakistan jooga wad sii wadanaysa waxaad sii ahaanaysa qof qaxoonti ah oo UNHCR khuseeya waana laga difaacayaa in si khasaba wadankaagi dib laguugu celiyo.

## MA WAAJIB BA INAAN DIB U DAJINTA LACAG KA BIXIYO?

Dhamaan khidmadaha ay bixiso UNHCR iyo xafiisyada la shaqeeeya wa kuwo **lacag la' aana**. Wa inaadan qofna lacag ka siin si kiiskaaga dib u dajinta laguugu fududeeyo. Tan waxa loo tix galinayaa khiyaamo waxayna sababi kartaa in kiiskaagi la diido.

## SIYAASADA LA DAGAALANKA KHIYAAMADA

Qof kasta oo qoxoonti ah oo sameeya musuqmaasuq la xidhiidha codsigiisa dib u dajinta waxa laaga yaabaa in si kama danbays ah looga joojiyo dib u dajinta. Tusaale ahaan Khiyaamada wax aka mida: inaad macluumaad khalada oo ku saabsan taariikhdaada; inaad ka been abuurto shaqsiyadaada iyo ta reerkaaga'; inaad dacwadaada kuso darto qof aan reerkiina ahayn; inaad waraaqo foojari ah aad so gudbiso; lacag inaad ku bixiso khidmadaha dib u dajinta ama aad lacag kaga qaadato dadka kale ee qaxoontiga ah khidmada dib u dajinta.

Hadii aad ogaato in qof shaqaale UNHCR ama xafiisyada la shaqeeya ka midi uu sameynaayo noockasta oo anshax darro ah, waa inaad si dhakhso ah aad ugu so wargalisaa UNHCR adigo waraaq ku ridaaya sanduuqyada cabashooyinka ee yaala UNHCR iyo

xafiisyaada la shaqeeya ama adigoo si toosa ula xidhiidhaya xafiiska kormeeraha guud ee xarunta wayn Geneva (fiiri cinwaanada hoos ku faahfaahsan) cabashadaada waxa loola dhaqmaya si sir ah kaas oo laga dhigayo sir. Ha dii aad rabto in cabasho gudbiso waxa lo baahanyay in aad ku so qorto magacaaga, dhalashadaada, iyo meelaha lagaala so xidhiidhayo, maaadama aan UNHCR si firfircoon ayna cabashooyinka qaar ayna u daba gali Karin.

Cabasho so gudbintu si taban u saamayn mayso sheegashadaadi qoxoontinimo ee UNHCR iyo qiimayn kasta oo kale oo ku saabsan kiiskaaga.

Fadlan waxa lagugula talinayaa inaad run ka sheegto markaad cabasho samaynayso, shuruucda maxaliga ah xaasidnimada ama eedayn been abuur ahi waxay dhali karaan cawaaqiib.

**Xafiiska Kormeeraha Guud ee UNHCR**

| | |
|---|---|
| E-mail: | inspector@unhcr.org |
| Fax sir ah: | +41-22-739-7380 |
| Cinwaanka email lada lagu diraayo: | UNHCR, Case postale 2500, CH-1211 Geneva 2 Depot |
| Telefoonka hotlineka: | +41-22-7398844 |

## XOG QARINTA

Si aada ayaa si sir ah loo ilaaliyaa dhamaan xogaha la siiyo UNHCR xiliga lagu guda jiro hanaanka dib u dajinta. Qaxoontiga kiiskooda loo gudbinaayo wadamada dib udajinta bixiya waxa looga baahanyay inay saxeexaan warqad cadayna si loola wadaago dhamaan macluumaadka iyo dhukmantiyada la xidhiidha dacwadaada masuuliyiinta dawlada dib u dajinta.

## MACLUUMAAD DHEERAAD AH

Hadii aad hayso wax su'aalo ah oo la xidhiidha hanaanka dib u dajinta ama xaalada kiiskaaga, shaqaalaha qaybta dib u dajinta UNHCR waxa laga la so xidhiidhi karaa cinwanadan so socda:

**UNHCR Islamabad**

| | |
|---|---|
| Maalinta inquiry ga: | Arbaca dhaaf (9:00-16:30) |
| Cinwaan ka: | SHARP Office, House no. 279-A, Nazim ud din Road, F-10/1 |
| Telefoonka hotlineka: | 0300-5018568 |

**UNHCR Peshawar**

| | |
|---|---|
| Maalinta inquiry ga: | Arbaca kasta (8:00-16:30) |
| Cinwaan ka: | 1 Gul Mohar Lane, University Town |
| Telefoon: | 091-5842375/6 |
| Telefoonka hotlineka: | 091-5704257 |

**UNHCR Quetta**

Telefoonka hotlineka: 0333-7833834

Fadlan xafiiska ha soo bookhan adigoon balan lahayn, balantaas oo aad ku samaysan karto telfoonka hotline ka.

**UNHCR Karachi**

Telefoonka numberka maalinka inquiry ga: 021-35290019 (Maalinkasto Isniina, 9:00-13:00)

Hotlineka: 0300-8153697

Marka aad soo bookhato UNHCR ama xafiisyada la shaqeeya UNHCR waxaa muhiima inaan keento numberka kiiskaaga, kaadhkaaga qaxoontiga ee UNHCR bixisay, cardka POR hadii aad haysato ama wax kasta oo kale oo waraaqo ah cadaynaayana aqoonsigaaga, marka aad UNHCR so wacdo, fadlan u sheeg qofka shaqaalaha ka qabta telfoonka magacaaga iyo numberka keyskaaga aad UNHCR ku leeday, tani waxay u ogolaanaysa inuu ku aqoonsado qofkaad tahy.